

HCAP: Yaraynta wakhtiyada qalliinka la sugo ee gudaha Calgary

Janaayo 23, 2023

Dadka reer Alberta waxay gudaha Calgary ka heli karaan kumanaan goobaha loogu tala galay qalliinka lafaha ah oo bulshadu maalgalisay taasoo qayb ka ah Qorhe Howleedka Daryeelka Caafimaadka (HCAP).

Alberta waxay leedahay shaqaalaha gurmada caafimaadka ee ugu wanaagsan dunida, dowladda Albertana waxay ka shaqaynaysaa xaqiijinta in dadka reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin, goorta iyo goobta ay uga baahan yihiin.

Yaraynta wakhtiyada sugitaanka qalliinkau waxaa la ogaaday in ay muhiimad weyn u leedahay Health Care Action Plan, taasoo la shaaciyay bishii Noofambar. Si ay gacan uga gaysato gaarista yoolkan, dowladda Alberta waxay qandaraasyo siinaysaa goobaha qalliinka ah ee dadweynuhu maalgashado ee madaxa banaan.

Canadian Surgery Solutions waxay bixin doontaa in ka badan 3,000 oo ah qalliimada badalidda lafaha lowga iyo sinta iyo qalliimada kale ee kala goosyada oo dheeraad ah muddo sannad ah ayada oo qandaraas kula galaysaa Alberta Health Service, laga bilaabo bishan.

Health Care Action Plan waxay sharci ay ku shaqeeyaan siinaysaa maamuleyaasha rasmiga ah ee AHS si loo yareeyo wakhtiyada sugitaanka qalliinka ayada oo lagu soo koobayo wakhtiyo caafimaad ahaan lagu talo bixinayo. Ayada oo qalliimo lagu fulinayo goobaha qalliinka ee aan hadda la isticmaalin iyo goobaha qalliinka loo diyaariyay, dadka reer Alberta waxay qalliinka ku heli doonaan si dhakhso ah.

Wakhti xaadirkaan, 6,000 oo ku sugan Calgary ayaa sugaya qalliinka lafaha. In ka badan kala bar ayaa sugaya wakhti aan caafimaad ahaan ku habboonayn badalidda lafaha lowga iyo sinta.

Qandaraasku wuxuu kordhin doonaa qaliimada lafaha ee laga sameeyo aagga Calgary 21 boqolkiiba marka loo barbardhigo 2021-22.

Dardargalinta soo gudbinaha qalliimada

Dadka reer Alberta waxay hadda heli doonaan qalliinka lafaha oo degdeg ah iyo soo gudbinaha khusaysa qalliinka kaadi mareenka ayaga oo adeegsanaya barnaamij cusub – Alberta Facilitated Access to Specialized Treatment (FAST). Dhaqaatiirta qoysaska iyo adeeg bixiyayaasha kale ee Alberta waxay dadka usoo gudbin karaan kooxda dhexe ee FAST, kuwaas oo intaa kaddib qofka loosoo gudbiyay ucayyimaya dhakhtarka takhassuska ah ee dadka sugayaa ay ugu yar yihiin. Barnaamijka oo gobolka oo dhan ka jira waxaa lagu bilaabay wajiyo kala duwan bishii Agoosto waxa uuna ilaa iyo hadda qabtay 18,500 oo qof oo loo soo gudbiyay dhakhtarka qalliimada lafaha iyo kaadi mareenka.

Sare u qaadidda awoodda qalliinka ee isbitaalada

Dhowr tallaabo ayaa lagu gudo jiraa hirgelindoota si sare loogu qaad awoodda qalliinka ee isbitaalada, waxaana kamid ah kordhinta sacadaha shaqada ee goobaha qalliinka. Qolal cusub oo qalliinka loogu tala galay ayaa lagu soo kordhiyay isbitaalada gobolka oo dhan, kuwaas oo ay ka mid yihiin Calgary, Edmonton, Edson, Grande Prairie, Lethbridge, Medicine Hat iyo Rocky Mountain House. Misaaniyad sanadeedka 2022 waxay \$133 milyan ku bixinaysaa muddo saddex sanno ah ballaarinta iyo dhisidda qolal qaliin oo cusub. Usoo gudbinta qalliimada lafaha goobaha qalliinka ee gaarka ah waxay culayska ka yaraynayasa qolalka qalliinka ee isbitaalada si loogu sameeyo qalliimada waaweyn.

Wararka la xiriira

- [AHS: Barnaamij cusub oo gacan ka gaysanaya sare u qaadista helitaanka khabiir caafimaad](#) (Diisambar 21, 2022)
- [Dib u habaynta AHS si sare loogu qado daryeelka bukaanka](#) (Noofambar 17, 2022)
- [Ballaarinta helitaanka qalliinka ee bartamaha, koonfurta Alberta](#) (Sibteembar 7, 2022)
- [Iskaashiga First Nations si loo yareeyo wakhtiyada sugitaanka](#) (Juun 1, 2022)
- [Dardargalinta kasoo kabashada qalliinka](#) (Abril 22, 2022)
- [Kordhinta qalliimada lafaha ee ay bulshadu maalgaliso](#) (Luuliyo 22, 2021)